




Buugga *“Gundhigga Xisaabaadka Ganacsiga”* ee uu qoray **Cabdirashiid Xasan Cilmi** waa hagitaan muhiim u ah qof kasta oo raba inuu fahmo sida ganacsigu u shaqeeyo marka laga eego dhinaca xisaabaadka. Buuggan waxa uu si fudud oo cad u sharaxayaa mabaa’diida aasaasiga ah ee xisaabaadka, isagoo si gaar ah u diiradda saaraya baahiyaha ganacsadaha Soomaaliyeed iyo sida uu u maareyn karo dhaqaale ahaan.

Qoraagu waxa uu ku bilaabayaa qeexitaanka xisaabaadka, ujeedadiisa iyo muhiimadda uu u leeyahay ganacsiga. Waxa uu si faahfaahsan u bixiyaa qaybaha xisaabaadka sida hantida, deymaha, sinnaanta, dakhliga iyo kharashaadka. Waxa kale oo uu akhristaha barayaa sida loo dhiso buug-xisaabeed hufan, loo sameeyo diiwaangelin maaliyadeed (recording), iyo sida loo diyaariyo warbixinno maaliyadeed oo sax ah.

Buuggu waxa uu faa’iido weyn u leeyahay ganacsatada yaryar, maamulayaasha, iyo ardayda baranaysa xisaabaadka, maadaama uu ku qoran yahay af-Soomaali sahlan oo la fahmi karo. Dhanka kale, wuxuu dhiirrigelinayaa dhaqanka maareynta lacagta iyo hufnaanta maaliyadeed, kuwaas oo ah furaha koritaanka ganacsiga. Waa buug mudan in uu akhriyo qof kasta oo raba horumar dhaqaale iyo maamul wanaagsan.

**halkaan ka aqriso Book ga**

Aqriso Booka Download